

# Ruqsadaha Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxaha badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo ruqsadaha

## Habraaca Kormeerka Farsamaynta ee SFD ee Dhismayaasha Cusub iyo kuwa Dib loo Habeeyay

*La Cusboonaysiiyay Abriil 2024*

Waaxda Dab-damiska Seattle (Seattle Fire Department) ayaa kormeero samaysay si loo hubiyo in dhismayaasha dhismuhu ku socdo iyo kuwa dib loo naqshadaynaayo ay waafaqaan xeerka Dabka [seattle.gov/fire/firecode](http://seattle.gov/fire/firecode). Kormeerayaasheena ayaa sidoo kale hubiyo in nidaamyada badqabka ee ugu muhiimsan sida ganbaleelada dabka iyo agabka dab damiska ootomaatiga ah si sax ah loo naqshadeeyo ayna shaqaynayaan marka dhismaha dadka loo furo.

### Goorma Ayaan Diyaar U Ahay Kormeer?

Dhamaan kormeerada, shaqada waa in la dhamaystiro, horay loo baaro lana diyaariyo.

Haddii aad heshay waraaqda qorshaha dulmarka ee SFD kuusoo dirto, dhammaan waxyaabaha ku qoran waraaqda waa in la xaliyaa kahor intaadan dalban kormeerka. Marka kormeeruhu yimaado si uu kormeerka u sameeyo, waxaa lagaa doonayaa inaad haysato koobiga waraaqda qorshaha dib u eegista iyo qorshaha la ansixiyay oo lagu dhajiyay goobta shaqada.

Haddii mashruuca u baahnaa aruqsad koronto ahaaneed, frasm, ama ruqsad kale oo gacansi oo ay bixiso Seattle Department of Construction and Inspections (Seattle Department of Construction and Inspections, SDCI), Ogolaanshahaaga waa inuu saxeeexo SDCI kahor inta aanad u wicin kormeer.

Waxaa jira habab dheeraad ah oo lagu ogaado sida aad diyaar ugu tahay noocyada kormeeritaanka.

### Kormeerka Galbaleelka Dabka

Kahor intaadan wacdin kormeerka, ruqsada korantada waa inuu saxeexaa SDCI oo nidaamka si buuxda loo tijaabiyey.

Midan waxaa ku jira dhammaan qalabka gargaarka iyo xakamaynta aalada digniinta dabka. Nidaamyada cusub (laakin aan ahayn hagaajinta kiraystaha ee nidaamyada jira), natiijooyinka tijaabada ka hor waa in lagu dhejiyaa

[www.thecomplianceengine.com](http://www.thecomplianceengine.com) adoo isticmaalaya shaxanka [Tijaabinta Aqbaalaada Aalada Digniinta](#) Fadlan koobi daabacan oo ah warbixinta Kormeeritaankaha Aqbaalaada ku hayso goobta kormeerahaaga. Goobta waa in loo tixgaliyaa "Final Clean", oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn dhammaan roogagga, saqafka, darbiga qallalan iyo albaabada oo loo diyaariyay si loo sameeyo tijaabooyinka dhagaysiga tijaabada aalada digniinta. Haddii dhismuhu uu leeyahay wiishka iyo xakamaynta qiiqa, alaabtaas waa in la ogolaada kahor kormeerka SFD. Mudada kormeerka, FA-1 farsamayaqaanka shahaado hasyta ayaa looga baahan doonaa inuu xaqiijiyo ogeysiinta Kormeerka Xarunta Dhexe.

### Badallitaanka Alaarmiga Dabka

Badalitaanka alaarmiga dabku wuxuu leeyahay kormeere kale oo xaalada kahor oo waxa uu u baahan yahay nidaamyo cusub ama hormarin cida kirada ugu jirta. Fadlan eeg Xaashida Macluumaadka Badalka [Alaarmiga Dabka](#)

### Kormeerka Waaxda Dab-damiska iyo Agabka dab-damiska Nidaamyada Kale ee Dab daminta

Kahor intaadan ugu yeerin kormeerka, qalabka lagu ilaaliyo daboolka qiiqa ama nidaamka xakamaynta waa inuu yaal goobta, la rakibay oo shaqaynaya (gaas ama koronto). Nidaamka loogu talagalay Koofiyadaha Qiiqa Qaada kahor inta uusan kormeeruhu imaan, hubi in uu jiro tabeelo yar ku dhagan daboolka qalabka lagu ilaaliyo daboolka, bidix ilaa midig, oo bixi dab damiye nooca K ah oo u dhow daboolka qiiqa bixiya. Fadlan Hubi in waxyaabaha soo socda u heli karo kormeerahaaga: Sawirada sida loo hagaajiyay, ruqsada farsamada ee SDCI ee daboolka Nooca 1, iyo/ama ruqsada nidaamka dab deminta xakamaynta ee badelka ah. Haddii nidaamka xakamaynta uu la socdo nidaamka digniinta dabka, markaa waxaad u baahan doontaa farsamoyaqaano wata shahaadada alaarmiga dabka iyo shahaado daboolka kala duwan ee jooga wakhtiga kormeerka si loo tijaabiyo nidaamka cusub ee la rakibay.

### Agabka Biyaha "Dhulka Hoostiisa" ama Dabka ee ku Xidhiidhsan Biyaha Magaalada-Baadhitaanka Kahor Dahaadhka Baadhitaanka

Kahor intaadan daboolin tuubooyinka isku xiraaya biyaha daminta dabka ee dhismaha oo lagu xariirinaayo nidaamka biyaha ee magaalada, waa inaad heshaa kormeerka "daboolka dhulka hoostiisa" oo ay samayso SFD. Dhamaan

[www.seattle.gov/fire](http://www.seattle.gov/fire)

Fire Prevention Division  
220 3rd Avenue South

[Seattle.gov/fire/business-services/email-fire-prevention](http://Seattle.gov/fire/business-services/email-fire-prevention)



Fire Department

biraha leysku xerxero, iwm. waa in ay dhamaystiran yahiiin lana mariyo laami ama maado kale oo hakkisa mirirka la ogolaan karo. Waxaa dhici karto in la fulliyo kormeerada blogyada inta uu socdo shubka ama kaddib. Waa inay muuqdaan joogga iyo ballaca qaybtu si loo cabiro. Sidoo kale eeg Sharciga Waaxda Dab-damista Seattle (Seattle Fire Department, SFD) 9.03 Shaxda A: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/fire-code-and-fire-safety-documents#administrativerules>. Sidoo kale eeg 2018 Seattle Sharciga Dabka 903.3.5 (agabka biyaha) iyo 903.3.5.4 (shuruudaha rakibaada). Baadhitaanka waxa uu isku dari karaa tijaabada biyo raacinta "dhulka hoostiisa" iyo/ama socodka oo badan laakiin maaha dhamaan xaaladaha, oo kala hadal baadhaha.

*Agabka Biyaha "Dhulka Hoostiisa" ama Dabka ee Ku Xidhiidhsan Biyaha Magaalada-Tijaabada Socodka Hydrostatic*

Tuubooyinka dhulka hoos mara iyo xariirada u dhaxeeya dhismaha iyo marinka biyaha magaalada ayaa lagu samayn karaa kormeerka daboolka, hase yeeshee, hoos u dhaca cadaadisku waa inuu ku jiraa heerarka la ogol yahay. Kormeerka qulqulka biyaha waa in la helo xoogga ka hor inta aan lagu xerin dhismaha ama Magaalada. Haddii la geliyay albaabka hubinta Magaalada, waa in la geliyo "surfiyada kariska." Eeg sidoo kale Sharciga Maamulka SFD 9.03 Shaxda A wixii xaqiijin dheeraad ah: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/fire-code-and-fire-safety-documents#administrativerules>. Waxaa lagu dari karaa tijaabada biyo raacinta "dhulka hoostiisa" iyo/ama socodka oo badan laakiin maaha dhamaan xaaladaha, oo kala hadal baadhaha.

*Agabka Biyaha "Dhulka Hoostiisa" ama Dab Damiska ee Ku Xidhiidhsan Biyaha Magaalada - Baadhaha Biyo Raacinta*

Waa in la fulliyo baadhitaanka ka hor inta aan lagu xeriirin nidaamka dhismaha. Sidoo kale eeg Sharciga Maamulka SFD ee 9.03 Shaxda A wixii xaqiijin dheeraad ah: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/fire-code-and-fire-safety-documents#administrativerules>. Waxaa la isku dari karaa tijaabada biyo raacinta "dhulka hoostiisa" iyo/ama socodka in badan laakiin maaha xaaladaha oo dhan, kala hadal baadhahaaga.

Fadlan la soco in **Agabka Qandaraaslaha iyo Shahaadada Tijaabada ee Beebabka Dhulka Hoostiisa** waa in la siiyaa baadhahaaga SFD si aad u hesho ogolaanshaha ugu danbeeya ee SFD. Eeg tusaalaha ku jira halkan: <http://www.seattle.gov/fire/businessservicesconstructioninspections#additionalinspectionprerequisitesforcertaininspections>.

*Kormeerka Nidaamka Biyaha Sayriya*

Waa in aad wacdid kormeerada daboolka ka hor inta aan la gelinin darbiga ama matoneelaha farageliya aragtida. Waqti kasta oo la baddalo ama la dhaqaajiyo madaxa waraabinta, waa in la sameeyo baaritaan.

*Baadhitaanka Ugu Danbeeya ee Qasabadaha Dabka Demiya ee Guriga Dhaxdiisa*

**Agabka iyo Shahaadada Tijaabada Qandaraaslaha ee Beebabka Dhulka Dushiisa** waa in la siiyo baadhahaaga SFD kahor inta aan la dhamaystirin ee SFD. Ka eeg tusaalaha halkan: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections#additionalinspectionprerequisitesforcertaininspections>

*Kormeerka Xaqiijinta Shaqada Nidaamyada Khadka Raadiyaha ee Gurmadka Degdega ah (BDA/DAS)*

Si aad ugu diyaargarowdo kormeerkaaga SFD ee nidaamka BDA/DAS, fadlan dib u eeg agabkan: <https://www.seattle.gov/fire/business-services/systems-testing#bdadasemergencyradiocommunications>. SFD waxay bixisaa xaqiijinta shaqada ee qasabka ah ee nidaamka iyadoo la adeegsanayo raadiyaha badqabka dadweynaha. Qandaraaslaha waa inay u soo gudbiyaan bilaabitaanka ama natiijada kabista "kormeeritaankaka aqbalaadda" SFD ugu yaraan 24 saacadood ka hor kormeerka SFD iyada oo loo marayo iibiyaha kooxda saddexaad [www.thecomplianceengine.com](http://www.thecomplianceengine.com) Si aad uga sameysato koonto si aad u gasho natiijooyinka imtixaanka fadlan booqo <https://www1.thecomplianceengine.com/company/register>

**Sidee ayaan ku Codsanayaa Kormeer?**

*Kormeerada Joogtada ah*

Inta badan kormeerada waxaa la fuliyaa saacadaha caadiga ah ee shaqada. Ka codso kormeer oonleena adoo booqanaaya websetkeena kadibna buuxinaaya foomka qaabka oonleena ah: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections>

*Kormeerka Wakhtiga Dheeraadka ah*

Adiga doonaya kormeeritaanka saacadaha hore ee aroortii ah, habeenkii ama maalmaha fasaxa, isticmaal foomka dalabka baadhitaanka onleynka ah oo dooro ikhtiyaarka saacadaha dheeraadka ah ee shaqo marka aad gudbiso saacadaha lagu baadhayo:

<http://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections>. Waxaa jiri doona kharash dheeraad ah oo saacadaha shaqo ee dheeraadka ah ee baadhitaanka oo ku salaysan kharashka shaqaalaha ee rasmiga ah ee SFD ee saacadaha shaqo ee dheeraadka ah.

Fadlan ka eeg [Dhaqamadayaada ugu Wanaagsan ee Qabsashada Balanta iyo Kormeerka](#) si aad uga fogaato khaladaadka caadiga ah oo aan noo ogolano in aan kuu ballan qaadno sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah.

**Waa maxay xogta aan U baahanahay Marka aad Codsanaayo Kormeerka?**

Waxaan u baahan nahay xog ku saabsan cidda dhiibaysa qarashka (laga qaadaayo lacagta kormeerka haddii aan horay loogu bixin ogolaanshaha SDCl) iyo sidoo kale xog ku saabsan

farsamo yaqaanka shahaadada ka haysta SDCI ee joogi doona inta kormeerku socdo. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad keento xog ku saabsan nooca kormeerka, cinwaanka, iyo tirada aaladaha la baaraayo.

### Ilaa Muddo Intee Horaysa ayay Tahay inaad Codsado Kormeerkayga?

Waxaan guud ahaan qorshaynaynaa hal ilaa laba todobaad ka hor si loo baaro waqtiyada caadiga ah sababtuna tahay helitaanka kormeerayaal. Kormeerada saacadaha dheeraadka ah ayaa hadda qorshaynaya ilaa laba ilaa saddex maalmood ka hor. Haddii aad raacdo habraacyada lagu sheegay qoraalkan caawimaada macmiilka, waxaad kaa caawin kartaa inaad iska ilaaliso dib u dhac ku yimaada kormeerka.

### Ma loo baahan yahay in aan joogo marka uu yimaado kormeeruhu? Ma u baahanahay in aan goobta ku haysto Qorshayaasha la la soo ogolaaday?

Haa, waa in uu joogo wakiil awood u leh fullinta tijaabinta loo baahan yahay, awood u leh fududeynta meelaha la fattasho, iyo shahaado ka haysto Waaxda Dabka Seattle. Qofkaan waa in uu:

- qofka fattasha u soo bandhigo kaarka shahaadada si loo xaqiijiyo.
- haysto koobiga handasaha la soo ogolaaday.
- haysto koobiga warqadda fiirinta handasaha.
- Haysto dhukumiintiyada kale sida lagu sharaxay qaybta hoose ee Shuruudaha Hore/Kormeerada Guul-daraystay iyo kuwa La seegay.

### Sidee ayaan ula Hadli karaa Kormeerahayga?

Waxaad fariin u reebi karaa kormeeraha SFD adoo wacaaya (206) 386-1443. Dadka wax fattasha waa ka soo jawaabaan telefoonada loo diro marka ay ku sugan yahiin xafiiska.

### Maxaan samaynayaa haddii qabo Su'aal La xariirta Xeerka marka Kormeeraha aan La heli Karin?

Sarkaal Darajo Dhexe leh ayaa la heli karaa maalintii oo ka jawaaba su'aalaha gaarka ah ee la xidhiidha shaqada baadhitaanada. Fadlan iimeel noogu soo dir [SFD\\_FMO\\_Engineering@seattle.gov](mailto:SFD_FMO_Engineering@seattle.gov). su'aalaha la xidhiidha, fadlan ku socodsii shaqada baadhitaanka.

### Ma leygu soo Dalici doonaa Kormeerka injineeriyada lagu guul Dareystay ama laga Baaqday? Waa maxay Shuruudaha Hore ee Kormeerka?

Lacagaha kormeerka dhismaha inta badan Seattle Fire Department ku dar kormeer ku noqosho ah oo lacag la'aan haddii nidaamku ka gudbo kormeerka koobaad. Si kastaba ha noqotee, haddii diyaargarow la'aanta qandaraaslaha ay tahay sababta kormeerka u guul-daraystay, Xeerka Dawlada Hoose ee Seattle wuxuu bixiyaa in Seattle Fire Department ee awooda inay soo ceshato kharashaadka waaxdu gashay si ay

samayso kormeerkaas. 2024, khidmada lacagta waa \$346 saacadiiba, oo ay ku jiraan wakhtiga lagu bixiyay isu diyaarinaya kormeerayaasha ee kormeerka, socdaalka, iyo goobta shaqada. Haddii alaabahan soo socda aan la dhammaystirin oo leh qoraalka laga heli karo goobta shaqada wakhtiga kormeerka SFD loo qorsheeyay inuu bilaabo, kooxda mas'uulka ah waxaa lagu dalaci doonaa kharashka kormeerka ee fashilmay:

1. Dhamaan agabka iyo shaqaalaha loo baahan yahay, oo ay u jiraan kuwa haysta shahaadada la xidhiidha, waa goobta.
2. Dhamaan baaritaanka hore ee loo baahnaa waa la dhamaystiray oo waraaqo ayaa u diyaar ah kormeeraha. Waxa ku jira ogaysiinta ogolaanshaha/ agabka loo soo gudbiyay SFD iyadoo la isticmaalayo [www.thecomplianceengine.com](http://www.thecomplianceengine.com) ee loogu talagalay: alaarmiga Dabka, BDA/DAS, Xakamaynta Qiiqa (ikhtiyaari ah kahor Luulyo 1), Aaladaha Yareeya Gariirka (ikhtiyaar ah kahor Luulyo 1) iyo Xakamaynta Qiiqa badan (ikhtiyaar ah kahor Luulyo Dib u eeg macluumaadka ku saabsan su'aalaha inta badan la iswaydiiyo (FAQ). Foomamka aqbalaadda loogama baahna TCO-yada, Hagaajinta Kiraystaha ee nidaamyada jira, ama [mashaaricda badalitaanka aaladaha](#) ee Seattle.
3. Cadaynta in ruqsada laydhka SDCI la saxee xay, hadii ay ku haboon tahay.
4. Caddaynta SDCI ruqsada wiishashka waa in la saxee xay, haddii uu jiro.
5. Qorshayaasha nidaamka dabka oo shaabadaysan/xirmo la ogolaaday (qasabada biyaha dab demiska, ganbaleelka dabka, iwm.) ayaa loo diyaarinayaa baadhaha, hadii ay ku munaasab tahay.
6. Beebabka biyaha ee dab demiska waxaa la raaciyaa digaarka qalalan ama marmarka, oo waxaa warka baadhaha, hadii ay haboon tahay.
7. Khadka biyaha dab demiska ee dhulka hoostiisa laguma daro oo waxaa arkaya baadhayaha, hadii ay ku haboon tahay.
8. Aalada digniinta dabka ee kama dambaysta ah, nuqul ka mid ah Foomka Ogolaanshaha Xakamaynta Sigaarka ee SDCI (cadaadiska), haddii uu jiro.
9. Si aad u hesho digniinta dabka ee kama dambaysta ah, Kormeerka Shaqeynta Saldhigga Dhexe.

Shayga 6 waa in la daabacaa oo uu heli karaa kormeeraha goobta. Shayada 3, 4 iyo 5 waa la daabici karaa oo la siinayaa kormeeraha, ama waxaad isticmaali kartaa kiniinkaada gudaha si aad u gasho websaytka ku haboon oo aad tustid foomka la ansixiyay ee la soo galiyay kormeerahayaga.

## Sidee ayaan ku joojinayaa kormeerka? Ma jiraan Qarashaad Haddii Aanan Joojin Kormeerkayga Xili Ku haboon?

Si aad u joojiso kormeer balansanaa, iimeel noogusoo dir aad ciwaan uga dhigtay "Jooji Kormeerka" soona raaci taariikhda kormeerka, waqtiga, goobta, iyo noociisa. Limeel u dir: [SFD\\_FMO\\_Engineering@seattle.gov](mailto:SFD_FMO_Engineering@seattle.gov) wixii baadhitaanka caadiga ah iyo saacadaha shaqo wixii ka baxsan.

Waxaa lagaa qaadi doonaa qarash haddii kormeerka la joojiyo adoon ogaysiis ku filan soo dirin. Qarashaadka iyo jadwalada ayaa ah sida soo socota:

- *Koreerka joogto ah* Ku baaji ugu yaraan 24 saacadood oo ogeysiis ah si aad uga fogaato kharashka baajitaanka soo daaha \$346.
- *Kormeerada Waqtiga Dheeraadka ah* Ee la joojiyo 9 subaxnimo maalinta shaqo ee ka horeysa baadhitaanka lagama qaadayo kharashka joojinta wakhtiga danbe ee kharashka shaqaalaha ee ay gashay Magaaladu.

## Maxaan Samaynayaa haddii aan Fahmin Sixitaanka loo baahan yahay?

Waxaad si toos ah ula xariiri kartaa fattashaha lagu xil saaray ama waxaad kala xariiri kartaa (206) 386-1443 si aad u heshid sharaaxaad kasta ama caddeyn kasta oo loo baahan karo.

## Goormaan Daggi Karaa ama Isticmaali karaa Dhismahayga?

Dagista iyo isticmaalka dhismaha waxaa kaliya la ogol yahay kadib marka SDCI ay oggolaato taasoo qaadanaysa Foomka Shahaadada Ogolaanshaha Dagista, waa xad gudub inaad dhismaha degto kahor intaadan qaadan ogolaanshahaan.

Mararka qaar shahaado ku meel-gaadhka ah oo deganaansho ah ayaa la ansixin karaa kahor inta aan la soo saarin Shahaadada Gelitaanka buuxda - fadlan eeg <https://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections> wixii macluumaad ah ee ku saabsan shahaadada kumeel gaadhka ah ee gelitaanka. Shakh siga aan ahayn shaqaale dhisme waxaa loo ogol yahay inuu galo dhismaha kahor inta aan la helin Shahaadada Kumeel Gaadhka ah ee Gelitaanka marka uu ogolaado Qandaraaslaha Guud, Qandaraaslaha Guud ayaa ka masuul ah bixinta tobobarka amaanka shakhsiyadka loo ogol yahay iyo inuu xaqiijiyo inuu haysto dhamaan agabka badbaadada shakhsi ahaaneed ee loogu baahan yahay goobta dhismaha sida uu dhigayo sharciga Labor & Industry Gobolka Washington. Dhamaan dadkaas kormeeraya dhismaha waxaa waajib ah inuu raaco Qandaraaslaha Guud ama cida uu wakiishay.

*Dadka u diyaarinta dhismaha dagista* uma baahna in dhismaha loo raaco marka uu ogolaado Qandaraaslaha Guud. Dhismayaasha qasabka ay tahay in lagu xiro agabka dabka dabiya, xaraynta ama aruurinta agabka dabku qabsan karo ee aan la xariirin dhismaha ayaa mamnuuc ka ah dhismaha ilaa nidaamka dab damiska la ansixiyo.

Sidoo kale ka fiiri xog ku aadan Shahaadooyinka Ku meel Gaarka ah ee Gelitaanka dhismaha halkaa: <https://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections>

## Goorma ayaan codsan karaa Ansixinta Shahaadada Gelitaanka Dhismahayga?

Marka siistemyada badbaadinta dabka la ogolaado lana fattasho lana dhamaystiro jidadka ka bixidda.

## Maxay yaahin khidmadaha aan ku bixinaayo Kormeerka?

Fadlan arag xogta qarashka ee lagu sheegay webseetkeena: <http://www.seattle.gov/fire/inspections>.

## Hadii Qandaraasle Leh Dhise Dhisme, Oo Ka Masuul ah Inuu U Yeedho Kormeere iyo Ansixinta Gelitaanka Ugu Danbeeya?

Milkiilaha sharciga ayaa mas'uul ka ah in uu waco kormeerada iyo ogolaashada. Haddii aad dooneysid in dhisahaada qaato mas'uuliyadaan, tani waa in lagu caddeeyo heshiiska. Hubso ruqsadaada iyo hubso in la bixiyay ogolaashada kama dambaysta ee la hubo si loo daggo, ka hor inta aadan u guurin dhismaha. Caadi ahaan, shirkadda gelinta ayaa qabata ballanka kormeerada gelintooda.

## Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan sharuudaha adeegyada Guriga ee Dadweynaha Seattle (SPU)?

Si loo ballamiyo kormeerada SPU xagga daaboolka dhulka hoose ama qalabka biyaha gadaal ka baxa ka baxa, wac (206) 684-5803, laga bilaabo 8:00 ilaa 9:00 a.m., ama 9:00 a.m. kaddib, wac (206) 684-3333.

SPU waxay u baahan tahay kormeerada tubada adeegga biyaha loo isticmaalo badbaadinta dabka iyo biyaha xaafadda. Fadlan raac lifaaqyadaan si aad u hesho xog dheeraad ah oo kasoo bixiyay SPU kuna saabsan tuubooyinka dhulka hoostiisa, shuruudaha qulqulka biyaha, iyo xariirada isdhaafka ah.

<https://www.seattle.gov/utilities/construction-resources/water>

Waxaad sidoo kale ka fiirin kartaa qaybaha xeerarka iyo axdiyada soo socda:

*Xeerka Dawlada Hoose ee Seattle (Xidhiidhinta, Cross Connections):* (Seattle Municipal Code, SMC) 21.04.070  
*Xidhiidhinta:* [https://library.municode.com/wa/seattle/codes/municipal\\_code?nodeId=TIT21UT\\_SUBTITLE\\_IWA\\_CH21.04WARARE\\_21.04.070CRNN](https://library.municode.com/wa/seattle/codes/municipal_code?nodeId=TIT21UT_SUBTITLE_IWA_CH21.04WARARE_21.04.070CRNN)

*Xeerka Maamulka ee Washington (Isku xirka Isdhaafka ah):* WAC 246-290-490: <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=246-290-490>